



Macluumaad loogu talagalay waalidiinta

Barnaamijka Mustaqbal Fiican

Barnaamijka Mustaqbalada Fiican (Brighter Futures Program) wuxuu ku siinayaa adeegyada iyo taageerada kaa caawinaya inaad siiso carruurtaada bilow wanaagsan oo nololeed. Tani waxay joojin kartaa dhibaatooyinka qoysku inaysan sii xumaan.

Barnaamijkan ma qoyskaygaa loogu talagalay?

Barnaamijka Mustaqbalada Fiican waxaa loogu talagalay qoysaska leh carruurta da'doodu tahay sideed sanno ama ka yar, amase filaya ilmo.

Waxaa laga yaabaa inaad awoodo ku soo biirida barnaamijka haddii aad ka hesho caawimaad yar qoyskaaga iyo saaxiibadaa oo waalidnimadu kugu adkaato.

Qoysaska ay soo wajahday dhibaatooyinka aalkolada iyo daroogada, arimaha caafimaadka madaxa, waalidiinta qaba dhibaato waxbarasho oo weyn, dhibaatooyinka maareynta dabeecada ilmaha, shaqaaqada qoyska ama uga baahan xirfad waalidnimo ayaa sidoo kale awooda inay soo galaan barnaamijka.

Sidee buu u shaqeeyaa barnaamijka Mustaqbalada Fiican?

Qoys kasta waxaa taageeraya shaqaalaha Mustaqbalka Fiican oo kaa caawin doona inaad hesho adeegyo iyo taageero sax ku ah qoyskaaga oo ay ka mid yihiin.

Guri ku soo booqasho

Shaqaalahaaga Mustaqbalka Fiican ayaa kugula kulmi kara si gaar ah gurigaaga. Waxaad heli kartaa caawimaad waxaadna ka hadli kartaa dhibaatooyinka waalid kasta heysta markay korinayaan carruurta yar yar.

Barnaamijyada waalidnimada

Waxaad la kulmi kartaa waalidiinta kale waxaadna baran kartaa siyaalaha aad ku caawin karto maareynta dabeecada carruurtaada.

Adeegyada carruurta ee tayada leh

Carruurtaada waxaa kuu xannaaneyn kara shaqaale aqoon u leh xannaanada carruurta iyo playgroups markay la ciyaarayaan carruurta kale.



“Waxaan dhab ahaantii u dhawrayaa Shaqaalaha Mustaqbalka Fiican ee igu soo booqanaya guriga. La hadalku wuxuu caawinayaa inuu ka baa'biyo dhibaataada madaxeyga si aan xoogga

u saaro ujeedooyinkayga. Hadda waxaan dhigtaa TAFE tanina waxay iga caawineysaa helitaanka shaqada aan rabo. Wiilkeygu wuxuu helayaa caawimaada uu u baahan yahay si uu ugu diyaargarooobo dugsi haddana wuxuu awoodaa inuu si wanaagsan ula ciyaaro carruurta kale. Maalin maalmaha ka mid ah waxaan rajeynayaa inaan caawiyo dumarka ay heysato shaqaaqada gurigu.”





Macluumaad loogu
talagalay waalidiinta

Barnaamijka Mustaqbal Fiican

Sidee baan ugu lug yeelan karaa?

Waxaa jira laba siyaalood oo aad ugu lug yeelan karto barnaamijka. Haddii aad ogolaato waxaa kuu soo gudbin kara hay'ad bulshadeed. Amase waxaa laga yaabaa in lagu helo warbixin khadka taleefanka ee DoCS oo ku talinaya inuu qoyskaagu caawimo uga baahan yahay barnaamijka.

Ma inaan ka qayb qaataa?

Maya, qoysasku iyagaa doorta inay ku soo biiraan barnaamijka Mustaqbalada Fiican. Qoysasku waxay sidoo kale go'aansadaan ilaa intay ku jirayaan barnaamijka wayna ka bixi karaan wakhtigii ay doonaan.

Maxaa ku xigga?

Waxaan ka wada hadli doonaa waxaad dooneyso inaad u qabato qoyskaaga iyo sidaan kuu caawin karno. Adiga ayaa khabiir ah markay noqoto arintu qoyskaaga.

Haddii aad u maleynayso inay ku caawineyso waxaan kaala hadli karnaa adeegyo kale, xubno kale oo qoyskaaga ah ama dad aad taqaan laakiinse waa haddii aad ogolaato oo keliya. Mar haddii aad soo gasho barnaamijka arimahaaga gaarka waa la ilaalinayaa waadna ku lug yeelanaysaa dhammaan go'amada la qaadanayo.

Inagoo wada jirna ayaan qorsheynaynaa qorshe waxaana ku xirriirineyaa qoyskaaga adeegyo iyo taageerada aad u baahan tahay. Waanu ku soo booqaneynaa si aan kuu weydiino sida barnaamijku u shaqeynayo. Haddii wax isbedelaan waxaan kuu habeynaynaa noocyo kale oo taageero ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Waxaad ka heli kartaa wax badan oo ku saabsan Barnaamijka Mustaqbalada Fiican adoo gelaya website ka DoCS ee ah www.community.nsw.gov.au ama la hadlaya hay'adan bulshadeed ee soo socota.



“Marka ugu horeysa waan ka welwelsanaa ka mid noqoshada

barnaamijka DoCS. Ka dib markii uu igu soo booqday guriga shaqaalaha Mustaqbalada Fiican si uu iigala hadlo barnaamijka waxaan fahmay siduu u caawinayo qoyskayga. Wadajir ahaan, shaqaalaha Mustaqbalada Fiican wuxuu iga caawiyey helitaanka adeegyadii aan ugu baahnaa wiilkeyga. Isagoo helaya taageero joogta ah wuxuu awoodaa inuu u hadlo si kalsooni badan leh wuuna ka helaa aadida dugsigga. Waxaan ku biiray koox waalidiin ah waxaana baraneynaa anagoo wadajirna sidii aan u wanaajin lahayn daryeelka iyo taageerada carruurteena. Waxaan leeyahay kalsooni badan waxaana rajeynayaa mustaqbal.”



NSW Department of
Community Services



New South Wales Government

Dadka sawirka qoraalkan ka muuqdaa waa tusaale ahaan keliya.